Xeerka Guulaysashada Arday Kasta (ESSA)
Waxa la hirgeliyey sharciga Diisambar 10, 2015, oo dib loo oggolaaday Xeerka Waxbarashada Hoose iyo Sare ee 1965(ESEA). ESSA waxa uu dhisaa shaqada gobolada, Wakaaladaha Waxbarashada Deegaanka(LEAs), degmo dugsiyeedyada, dugsiyada jaartarka,dugsiyada qabiilka, iyo dugsiyada la hirgaliyay in ka badan dhawr sanno ee ugu dambaysay. Sharciga dib u oggolaanshuhu waxa uu ahmiyadda sinayaa sinaanta iyo heerka sare ee ardaydeena oo uu taageeraa barayaasha muhiimka ah. Sida qaybta ka ah ESA, LEAs iyo dugsiyadu waa inay siiyaan waalidiinta waxyaabaha soo socda:

1. Kaararka warbixinta shaqsiga kuwaas oo kuu oggolaanaya inaad ogaato sida ilmahaagu uu u horumarayo
2. Shahaadooyinka xirfadeed ee macalimiinta iyo kaaliyayaasha waxbarsho.
3. Ogeysiiska in macallinka ardaygu u haysto sharciga/shahaado siinta goboka ee xaddidan.
4. Macluumaad ku saabsan qiimaynaha gobolka iyo deegaanka.
5. Siyaasadda LEA ama gobolka–ka qaybqaadashada gobolka ee qiimaynaha.

Kaarka Warbixinta ee Arday Kasta
Waxaad leedahay xuquuqda inaad ogaato sida fiican ee ilmahaagu u horomarayo. Dugsiyada ku shaqeeya barnaamijyada Title I, Part A waa inay abuuraan kaar warbixin oo loogu talogalay arday kasta kaas oo sharaxaad ka bixiya sida fiican ee ardaygu u suubiyay dhibcaha qiimaynta, ugu yaraan, akhriska, farshaxanka luqadda Ingiriisida, iyo xisabta.

Barnaamijka Title I, Part A waxa uu u oggolaadaa LEAs iyo dugsiyadu inay bixiyaan adeegyo iyo faragalino taageraya halganka barayaasha. Title I, Part A waa mid ka mida barnaamijyada badan ee ay maamusho ESSA. Labada nooc ee barnaamijyada dugsiyadu ay maalgalin karaan iyagoo u maraya Title I, Part A waa Schoolwide iyo Targeted Assistance.

- Schoolwide waxa uu ka dhiganyahay in dhammaan ardayda— iyadoo lagu salaynayo baahida tacliimeed—ay u qalmaan inay helaan waxabarashada dheeraadka ah ee barnaamijkan federaalku uu maalgalin doono.
- Targeted Assistance waxa u suurtogaliyaa inuu bixiyo qaarkamida dheefaha laakiin kaliya si loo soo xulo ardayda iyadoo lagu salaynayo baahida tacliimeed.

Nala Soo Xiriir
Xafiiska Title I, Part A
360-725-6100

Office of Superintendent of Public Instruction
Old Capitol Building
PO Box 47200
Olympia, WA 98504-7200

Online-ka Title I, Part A
www.k12.wa.us/TitleI/default

Waaxda Waxbarshada ee Maraykanka
1-800-USA-LEARN (872-5327)

OSPI waxay bixisaa helitaan loo simanyahay dhamman barnamijyada iyo adeegyada iyadoo aanay jirin takoorid ku salaysan jinsi, qolo, caqiido, diin, midab, asal, da'a, askar hore oo si sharaf leh u fadhiistay ama xaalad milatari, nooc galmo oo ay ku jirto muuqa jinsiga ama aqoonsigu, jiritaanka dareen kasta, maskax ahaan ama naafo jidh ahaan, ama istimaalka ay tababaran higida ama adeega xayawaanku u sameeyo qofka naafada ah. Su'aalaha iyo Tabashooyinka takoorka la eedeeyay waa in si toos ah loogu soo hagaajiyo Agaasimaha Sinaanta iyo Xuquuqda Madaniga ah (360) 725-6162 ama P.O. Box 47200 Olympia, WA 98504-7200.

Waalid/Ilaaliye
Xuqa in Lagu Wargeliyo

Barnaamijyada Title I, Qaybta A

Xafiiska Isuduwaha Waxabrashada Dadweynaha,
Title I/Waaxda LAP

Xaqa aad u Leedahay inaad Ogaato

Shahaadooyinka xirfadaha ee Macaliimiinta iyo Kaaliyayaasha

Waalidiinta carrurta dhigata dugsiyada Title I, Part A xaq ayay u leeyihiin inay codsadaan oo ay helaan macluumaad ku saabsan shahaadooyinka macalimiinta iyo kaaliyayaasha siiya waxabrashada aradayda.

Aqoonta Macallinka

Macalimiinta, ugu yaraan, macluumaadka lagu siiyay waa inuu sharaxaa saddexdan qaybood ee muhiimka ah ee shahaadooyinka baraha. Haddii maclinka ardaygu–

- ✓ Uu daboolo shahaadada gobolka iyo shuruucdda ruqsad siinta ee heerarka fasalka meelaha maadada macallinku uu bixiyo waxbarashada.
- ✓ Uu ku barayo xaalad degdega ah ama xaalad kale oo khabiirnimo isagoo umaraya mida shahaadada goboka iyo shuruuda ruqsad siinta laga dhaafay.
- ✓ Uu ku barayo qaybta anshaxa shahaadada macallinka.

Aqoonta Kaaliyayaasha

Barnaamijka Title I, Part A, Kaaliyayaashu waa inay shaqeeyaan iyada oo ay kormeeerayaan maclimiin shahaado haysta. Dugsiga ku shaqeeya barnaamijka Schoolwide, dhammaan kaaliyayaashu waa inay daboolaan shaqooyinka xirfadda. Barnaamijka Targeted Asistance, kaaliye kasta oo si toos ah uu u kormeeray macallin shahaado haysta waa inuu daboolka xirfada aqoonta.

Si uu u daboolo shuruudaha Title I, Part A, kaaliyayaashu waa inay haystaan dibloomada dugsiga sare ama GED ama waa inay:

- ✓ dhammeeyeen ugu yaraan laba sanno oo waxbarasho ah ee machadka tacliinta sare; ama uu haysto degree hoose ama degree sare; ama
- ✓ haystaan degree hoose ama degree sare; ama
- ✓ Ay gudbeen Qiimaynta ETS ParaPro. Xirfadaha cabiraada qiimaynta iyo aqoonta ka kooban ee la xidhiidha akhriska, qoraalka iyo xisaabta;
- ✓ Hore u dhammaystireen shuruudaha heshiiska waxbarashada, oo waa inay haystaan kaarka socdaalka ama shahaado. Faylalka tacliimeed iyo barashada xirfadddu ma bixiyaan diwaangalinta; hasayeeshee, Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha (OSPI)ayaa sii wadi doona inuu maamuuso jidkan.

Ogeysiiska Haddii Macallinka ilmuhu uu haysto Shuruudaha Shahaadada/ Shatiga Gobolka WA

Waalidiintu waa inay helaan ogeysiis waqtiyaysan in ilmahooda uu u qoondeeyay ama uu baray macallin haysta shaadada/sharciga gobolku xadiday in kabadan afar toddobaad oo xidhiidhsan. Ka baro waxbadan oo ku saabsan macallinka iyo shuruudaha tacliimeed ee kaaliyaha online-ka:

Guddida Heerarka Waxabrasha Khabiirnimada (PESB) www.pesb.wa.gov ama
Title II, Part A– Tayada Maclinka iyo Maamulaha: www.k12.wa.us/TitleIIA

Macluumaadka ku saabsan Qiimaynta Gobolka iyo Degaanka

Waalidiintu waa inay helaan macluumaadka ku saabsan qiimayn kasta oo ay u baahanyihiin gobolka iyo degmadu. Macluumaadkan waa inay ku jiraan:

1. Mawduuca la qiimeeyay.
2. Ujeeddada qiimaynta.
3. Isha shuruudaha.

Haddii macluumaadka la heli karo, LEAs iyo dusiyadu waa inay bixiyaan (oo ay ku jiraan soo dhigidda bogagooda internetka):

- ✓ Dherarka waqtiga la filayo iyo jadwalka qiimaynaha.
- ✓ Waqtiga iyo qaabtka baahinta natiijooyinka.

Macluumadka ku saabsan Siyaasada Gobolka ama LEA– Ka qaybqaadashada Ardayga ee Qiimaynaha

Bilawga sannad dugsiyeed kasta, LEA waa inay ogeysiiyaan waalidiinta in laga yaabo inay codsadaan (oo LEA ayaa keeni doonta) macluumaad la xidhiidha siyaasada kasta oo gobol ama LEA oo la xidhiidha ardayga ka qaybqaadanaya qiimayno kasta oo ay u xilsaarantahay qaybta 1111(b)(2), iyo gobolka ama LEA. Macluumaadka waa inay ku jirtaan siyaasadda, nidaamka, ama xuquuqda waalidka uu u leeyahay ikhtiyaarka aad ilmaha kaga sari karto qiimaynta, halka laga dabaqi karo. [Qaybta ESSA 1112 (e)(2)(A)]

Maxaa loogu Baahanyahay Imtixaanka Gobolka?

Degmo dugsiyeedayda iyo Bulshooyinku way ka duwanyihiin gobolka oo dhan. Qoysasku waxay xaq u leeyihiin inay ogaadaan ilmahoodu inuu horumarayo dhinaca la xidhiidha kuliyadda iyo u diyaarsanaanta xirfadda. Degmooyinku waxay u baahanyihiin inay ogaadaan haddii manhajka ay doorteen inay baraan ardaydooda si ay u daboolaan heerarka barashada gobolka inay shaqaynayaan, ama haddii ay sameeyaan hagaajino.

Intixaamidda Gobolka waxa looga baahanyahay sharciga gobolka(RCW 28A.230.095) iyo xeerka federaalka ((Xeerka Waxbarashada Hoose iyo Sare). Baro wax badan oo ku saabsan sababta imtixaamidda loogu baahanyahay Bogga internet ee Su'aalaha Ugu Waydiinta Badan ee Qiimaynta: www.k12.wa.us/assessment/StateTesting/FAQ.aspx